






Dugsiga xanaanada

HEERARKA HAGISTA QOYSKA EE MINNESOTA

Waxa ay tahay in canugaado ogaado
Hawlaha iyo tusaalooyinka ELA & Xisaabta
Qaababka loola hadlo macalimiinta



great
MN
SCHOOLS



Ku saabsan hagahan


Qoysaska waxay doonayaan in ay ogaadaan waxa canugooda uu ka baranaaayo iskuulka. Waxay u yihiin canugooda maaclinka ugu horeeya uguna muhiimsan.

Waaxda waxbarashada Minnesota ayaa go'aamisa waxa canug walba uu ka baran doono iskuulka dhamaan xiisadaha. Hagahani wuxuu kaa caawinayaa in aad ku fahamto heerarkaas farshaxanka luqada ingiriiska (ELA) iyo Xisaabta. Tani waxay kaa caawin doontaa in aad saaxiib dhow lanoqoto canugaaga macalinkiisa si aad u caawiso waxbarashada inta lagu gudajiro dugsiga xanaanada.

KAHOR INTA AADAN BILAABIN

Kahor inta aanan dib u eegis ku samayn hagahan, waxaan idinku dhiirigelinaynaa in aad qiimeeysaan eerka xiligan ardaydiina ay ka taagan yihiin fasalka belearninghero.org/readiness-check-mn.





Hagahan waxaa ku jira

Waxa ay tahay in canugaaga ogaado uuna aboodi karo in uu sameeyo—

BOGGA 4 EE ELA IYO **BOGGA 10** EE XISAABTA

Nuxurka ugu muhiimsan (Aqoon iyo xirfad) ee ardayda ay ka baranayan dhamaadka dugsiga xanaanada



Tusaalooyinka ELA—

BOGGA 6

Shaqo tusaale ee canugaaga ay tahay inuu awoodo in uu sameeyo dhamaadka dugsiga xanaanada



Hawsha maalinlaha ah ee lagu taageero waxbarashada—

BOGGA 7 EE ELA IYO **BOGGA 12** EE XISAABTA

Qaababka aad ku caawin karto canugaaga in uu barto nuxur muhiim ah iyo xirfada farshaxanka luqada ingiriiska (ELA) iyo xisaabta



Qaababka macalimiinta loo la hadlo—

BOGGA 8 EE ELA IYO **BOGGA 13** EE XISAABTA

Sida adiga iyo canugaaga macalinkisa aad si wadajir ah ugu wadashaqayn kartaan si canugaaga uu u horumaro



Qaamuuska ereyada waxbarashada—

BOGGA 14

Qeexida ereyo aqooneedka guud ee quseeya dugsiga xanaanada





Farshaxanka luqada ingiriiska

WAXA AY TAHAY IN CANUGAAGA OGAADO UUNA SAMAYN KARO

Marka la dhiganayo dugsiga xanaanada, ardayda waa in ay ku bixiyaan waqtigooda ugu badan hanashada xirfadaha aasaasiga ah ee loo baahan yahay in lagu barto sida wax loo aqriyo loona qoro. Ardayda waa in ay haystaan qoraal kor loogu aqriyo waana in ay iyaga laftood aqriyaan. Qoraalada kalabar waa in ay ahaadaan mala-awaal barka kalena aan mala-awaal ahayn. Qoraalada waa in ay matalaan dad kala duwan, aragtiyo, iyo aqoonsiyo.

Si aad u aragto dhammaan heerarka gobolka ee ELA ee fasalka dugsiga barbaarinta fiiri halkan: education.mn.gov/mde/dse/stds/ela

Dugsiga xanaanada waa in ay fahmaan sida si fiican loogu sameeyo waxayaabaha soo socda dhamaadka sanadka:

BARASHADA QORIDA IYO AQRINTA

- ☑ Magacow dhamaan xarfaha waaweyn iyo kuwa yaryar. Ku hagaaji xarfahaas dhawaaqooda. Si cad u qor dhamaan xarfaha¹

Directions: Say the name of each picture. Write the letter “m” next to each picture whose name begins with the /m/ sound













- ☑ Ku dhawaaq ereyada 3 dhawaaq oo asaasi ah. Jiibi, sacab tuma, oo tiriya shibbaneyaasha. Soo saarida dhawaaqa bilowga, dhex bartamaha iyo dhamaadka ku jira eyeyada lagu hadlay

van

can

hog

hat

sad

fan

- ☑ Isku aadi xarfaha iyo dhawaaqa si aad u qorto 3 erey oo shibbane aasaasi a. Qor jumlado leh ereyo kala fog fog
- ☑ Aqri qoraalada la kala saari karo si aqrinta ay u noqoto mid fasiix ah. Raac ereyada laga bilaawo bidix illaa midig iyo kor illaa hoos

~~Plants need water to grow~~
~~plants need sun to grow~~

Plants need water to grow. Plants need sun to grow.

WAX KA OGAANSHAHA DUNIDA AYADOO LOO MARAAYO QORAAL

- ✔ Suaalaha weydiinta iyo jawaabaha ku saabsan sheekooyinka iyo qoraalada ee lagu aqriyo cod dheer iyada oo ay la jirto xoogaha caawin. Dib u sheeg wixii dhacay sharaxna fikradaha muhiimkaa ah
- ✔ Isticmaal iskudarka sawirada, hadalka iyo qorida si aad uga jawaabto su'aal ama aad u sharaxdo dhacdo ama moowduuc laga soo qaaday qoraalka. Caruurta waxaa laga yaabaa in ay isticmaalaan jumlado fudfudud iyo xoogaha higaad hal-abuur leh
- ✔ Fahan micnaha erayada aan la garanaynin adiga oo isticmaalayo sawiro, qoraalo
- ✔ Tusi wax cusub oo ay ka barten qoraalka ama moowduuc ku saabsan. Tani waxay noqon kartaa qaab kasta: Hadal iyo wadasheekaysi, sawiro, xarfo, joornaalo, sheekooyin, kaartooyin, ama jumlado boga ku qoran


TUSAALOYINKA FARSHAXANKA LUQADDA INGIRIISKA EE DUGSIGA XANAANADA



Kuwa soo socdaa waa tusaale qoraal ah oo la badali karo ee heerka fasalka barbaarinta. Carruurta waa in ay helaan qoraallada noocan ah si ay u bartaan sida loo akhriyo qaababka higgsaada ee aan la baranin.

Kit
Kit can run.
Kit can skip.
Kit can flip and flop.
Kit can swim.³


Hoos waxa yaala tusaale heerka wax qorista ee dugsiga xanaanada.²



¹Tusaale lagu helay ogolaansho katimid Core Knowledge Language Arts Curriculum. "CKLA Unit 1." <https://www.coreknowledge.org/curriculum/download-curriculum/>

²Shaqadani waxay ku salaysan tahay shaqadii asalka ahayd ee Core Knowledge® Foundation oo lagu helay shati siinta hoos timaada ee Creative Commons AttributionNonCommercial-ShareAlike 3.0 Unported License. Tani sinaba macnaheedu ma ahan in Aasaaska Aqoonta Muhiimka ah ay ayiday shaqadan.

³Munaad qoraal oo lagu helay ogolaansho katimid arday saaxiibadood. "Munaada qoraalka ardayga." Achieve the Core, <https://achievethecore.org/category/330/student-writing-samples>



HAWLAHA MAALINLAHA AH EE LAGU CAAWIYO WAXBARASHADA

✿ ***Kor ugu aqri canugaaga ugu yaraan ilaa 20 minutes maalin walba. Ka hadal waxay aqrinayaan, ka doodayaan, iyo wax ka qorida iskuulka***

- Isla doorta wax aad isla barataan. Aqri buugaag, ka fiiri onleenka islana sameeya si aad wax badan uga barataan moowduuca la doortay. Waad caawin kartaaa canugaaga in uu dhiso aqoon uuna jeclaado waxbarashada
- La ciyaar canugaaga ciyaaraha dhawaaqa. Dooro xaraf dhawaaq leh si aad u bilowdo inta ereyo ee aad samayn karto ee ku jira jumlad e (“Leo Lion laughs loudly”)
- Sameey kalmado aan macno lahayn (“big,” “boom,” “bop,” “biz,” “baz”) Sacabka ku garaac shibanayaasha kujira erayada dhaadheer ee aad isticmaasho (cook + ing, laugh + ing, to + geth + er). Wadajir u heesa oo ku dhawaaqa erayada jiiibta ah
- Soosaar dhawaaqa ereyada lagu hadlay ee kujira bilowga, dhex bartamaha iyo dhamaadka. Ukala saar ereyada dhawaaqooda (/b/ /a/ /t/) kadibna dib isugu keen (“b-a-t, bat!”)
- Canugaaga haka caawiyo qoritaanka dhabta ah. Isticmaal dhawaaqyada bilowga ah, kadibna ku dar dhawaaqyada dhamaadka ama kuwa dhexe “Aanu bilowno liiska raashiinka. Xarafkee ayay tahay in aad qorto say iiga caawiso in aan xasuusto in aan caano soo gato?”



SOO JEEDIN

QAABABKA LOOLA HADLO MACALIMIINTA



1. Maxay tahay canugayga awoodihiisa, sideena ugu adeegsadaa tilmaamaha?
2. Sidee u dooraata qoraalada? Miyuu canugayga arki doonaa xarfo & mowduucyo ayaga matalaya, taariikhdooda, & aqoonsigooda. Miyay baran doonaan fikrado cusub kuna saabsan xarfo kala duwan ayadoo loo maraayo qoraalada fasalka?
3. Ma itusin kartaa natiijadii ugu dambaysay ee imtixaanka kawarqabida dhawaaqyada ee canugayga?
4. Xarfahee iyo dhawaaqyadee ayay tahay in canugayga uu xifdiyay xiligan ee sanadka? Canugayga miyuu xifdiyay dhawaaqyadan? Miyuu canugayga haystaa fursad uu ku aqriyo qoraalada kuwaasoo ka caawiyo iyaga in ay bataatikeeyaan kala saarida dhawaaqyada ay baranayaan? Hubi in aad ka hadasho waxa aad ku arkayso guriga
5. Moowduucyadee ayay caruurta ku baranayaan aqriska? Maxay tahay canugayga in uu fahmo, qoro, kana hadlo taasoo ka dhalatay natiijada waxay aqriyeen? Mowduucyadee ku jira taariiqda? Mowduucyadee ku jira sayniska?
6. Canugayga ma awoodaa in uu hadlo, sawiro ama uu u qoro qaabab ku tusinaya in ay fahmeen waxay aqrinayaan ayna baranayaan? Hadii aysan sidaa ahayn, maxaa caqabad ku ah?
7. Buugaag nooc ee ah ayuu canugayga aqrinayaa inta lagu guda jiro aqrinta madaxa banaan? Miyaa lagu xadeeeyay heer aqrin oo gaar ah?
8. Ma haystaa canugayga fursad uu fasalka dhexdiisa ku baraatikeeyo qoraal gacmeedka? Miyuu canugayga si cad oo sharci ah wax u qorayaa?

Waalidiinta

Macalimiinta



20



Xisaab

**WAXA AY TAHAY IN CANUGAAGA
OGAADO UUNA SAMAYN KARO**

Inta la dhiganayo dugsiga xanaanada, ardaydu waxay helayaan macnaha tirada aasaasiga ah, oo ay ku jiraan: tirinta, isbarbardhigga xajmiga tirada, iyo isku-darka iyo kala-goynta aasaasiga ah.

Si aad u aragto dhammaan heerarka xisaabta fasalka dugsiga barbaarinta fiiri halkan:
education.mn.gov/MDE/dse/stds/Math

Ardayda dugsiga xanaanada waxay waqtigooda ugu badan ku bixin doonaan barashada moowduucyadan soo socda. Waa i nay si fiican u fahmaan dhamaadka sanadka.


BARASHADA XISAABTA EE DUGSIGA XANAANADA

- ✔ Aqri, qor oo soo bandhig (iyadoo ay lasocdaan sawiro ama xariiqmooyin) tiro dhamaystiran oo ka bilaawata 0 illaa 31
- ✔ Horay iyo gadaal u tiri ilaa 20. Tiri walxaha si aad u sheegto inta aya yihiin
- ✔ Kooxo dhan ilaa 20, isku barbardhig labo koox walxa ah si aad usheegto kooxda wax badan haysata
- ✔ Fahan labada tiro ee qoran midka wayn ee u dhaxeeya 1 iyo 20. **Tusaale ahaan, ardayda waa in ay ogaadaan in "6" ay ka wayn tahay "2"**

$$6 > 2$$

- ✔ Sameey mas'alooyin iskudarka iyo kaljarka. Sawir sawiro si aad uga shaqayso su'aalo
- ✔ Iskudar caddad 10 ah ama ka yar. Kajar tiro 10 ama wax ka yar
- ✔ Si sax ah oo deg deg ah u raadi tirada taasoo 1 ka badan ama 1 ka ayar. **Tusaale ahaan, 3 + 1**

$$3 + 1 =$$






HOWLAHA MAALINLAHA AH EE LAGU CAAWIYO WAXBARASHADA

- Baraatikey tirinta horay iyo gadaal. Hadaf yeelo iskuna day in aad ka sii horumariso asbuuc walba
- Uruuri walxaha guriga agagaarkisa yaala canugaagana ha ku tiriyo cod dheer. ("Hal sabiib. Labo sabiib.")
- Waydii canugaaga "Meeqaa Su'aalooyinka. Meeqo sabiib ayaa ku jirta tubtaan? Meeqo ayaa ku jirta tubta?". Istcimaal caddad yar uu canugaaga si sax ah u tirin karo
- Ukala qaybi labo koox si aad u waydiiso su'aalaha kabadan/kayar/ lamid ah . ("Sabiib badan maa ku jira kooxdan ama midaas")
- Isla ciyaara ciyaarta turubka iyo safiitada geemka kuwaa oo ku lugleh tirinta iyo isku barbardhiga tirida. ("Waxaan haystaa 5 wadno adigana waxaad haysataa 7 badiil, yaa guulaysanayo?"

$$7 > 5$$

- Aqri buugaagta ku lug leh tirinta







QAABABKA LOOLA HADLO MACALIMIINTA

1. Tiro su'aalo noocaa ah ayay caruurta baranayaan si ay uga shaqeeyaan sanadkan?
2. Ma itusin kartaa natiijada imtixaanka xisaabta canugayga ee ugu dambaysay?
3. Sidee canugayga uu horumar uga sameeynayaa fahamkooda ku aadan nuxurka ugu muhiimsan ee fasalka? Mala wadaagi kartaa waxcusub oo gaar ah?
4. Sidee canugayga uu u wajahaa shaqooyinks xisaabta adag? Sideen ugu dhiirigelin karaa in ay bartaan nuxur adag?
5. Maxaa la gudboon in canugayga uu fahmo oo uu ka hadlo wuxuu bartay?
6. Canugayga maku tusi karaa in ay iyaga fahmayaan waxa ay barten? Hadii aysan sidaa ahayn, maxaa caqabad ku ah? Sideen ku caawin karaa?
7. Sideen ugu dhigi karaa barashada xisaabta mid wanaagsan?

Suaalo?





Qaamuuska ereyada waxbarashada

Aqoonyahanada waxay isticmaalaan ereyo micno gaar ah kuleh iskuulaadka. Fahamka ereyadaas waxay kaa caawin doonaan in aad la hadasho macalinka.



KALA SAAR



Adigoo isticmaalaya xiriirka xarfaha iyo dhawaaqa ee sida saxda ah loogu dhawaaqo ereyada. Tusaale ahaan, caruurta baratay dhawaaqa ingiriiska /a/, /c/, & /t/ way kala saari karaan “cat.”

QORAALO LAKALA SAARI KARO



Buugagta leh dhawaaqa iyo higaada isla socda ee macalimiinta horay ugu bareen fasalka ardayda way kala saari karaan ama ku dhawaaqi karaan ereyada intooda badan ee ku jira qoraalka.

HIGAAD HAL-ABUUR LEH



Markay ardayda baranayaan qorida, waxay qoraan dhawaaqa ay maqlaan. Waxaa laga yaabaa in aysan si sax ah u higaadinin ereyada. Tani waxay macalimiinta ugu yeeraan “Higaad hal-abuur leh”. Ardayda waxay isticmaalaan iskuxerka xarfaha iyo dhawaaqa lagu baray iskuulka si ay ugu dhawaaqaan ereyo. Muhiimad badan malahan in aad higaad sax ah haysato.

KAWARQABIDA DHAWAAQYADA



In aad ogtahay in ereyada ay ka kooban yihiin dhawaaqyo badan oo keli keli ah (Ardayda waa in ay awoodaan in ay gartaan, soo saaraan ayna ku ciyaaraan dhawaaqyada keli keliga ah). Waxaad ka heli kartaa muuqaal ay ku jiraan dhamaan 44 dhawaaq oo ingiriis ah <https://www.youtube.com/watch?v=wBuA589kfMg>

KA WARHAYNTA DHAWAAQA



Garashada dhawaaqa luqad. Tusaale, jibta, shibbanesyaasha iyo dhawaaqyada kujira ereyada.

HEERKA AQRINTA



Inta badan macalimiinta waxay ku cabiraan heerka wax aqrineed ee ardayga, badanaa waxaa lagu asteeyaa xaraf ama tiro. Tani waxay macalinka ka caawinaysaa waxa ardayda u baahan yihiin in ay bartaan. Laakiin mararka qaar, caruurta waxaa loo ogolyahay keliya in ay aqriyaan qoraalo heerkaas ah. Ka digtoonoo baraatikeeyn tan. Caruurta waa in aan lagu xadaynin aqrinta qoraalada heerkoda keliya ah ama ka hooseeya ujeedada heerka fasalkooda.

TIRINTA CAADIGA LOO TIRIYO



Tirinta tirooyinka sida ay ukala horeeyaan (1, 2, 3, 4, 5...)

EREYADA ARAGA



Ereyo kasta ee canug uu si dhaqsi ah oo dabiici ah u aqrin karo. Tusaale ahaan, "to", "the," "at."

ISKUDARKA




Jawaabta aan helayno marka la iskudaro labo iyo inka badan.

TIXRAACYO

Minnesota Department of Education Academic Standards <https://education.mn.gov/mde/dse/stds>

Seek Common Ground Family Guides <https://seekcommonground.org/family-guides>

Core Knowledge Language Arts Curriculum <https://www.coreknowledge.org/curriculum/download-curriculum/>



QORAALO

Handwriting practice lines consisting of solid top and bottom lines with a dashed middle line, repeated five times.



Waxaa kuu keenay ururka aan faa'iido doonka ahayn, Dugsiyada Great MN. Ogow waxbadan & oo ugu deeq greatmnschools.org.

Nala wadaag waxa aad ku samaysay gaadkan!

